

Sida Loo Isticmaalayo Teleefonka Degdegga ee 911



Waa maxay 911?

- Wadanku Maraykanku waxa uu go'aan ku gaadhay in lambar teleefon 911 loo isticmaalayo adeegyada ka-jawaabista wixii degdeg ah. Lambarkaa waxa laga wici karaa lacag la'aan teleefon kasta marka loo baahan yahay waxqabasho degdeg ah.

Goorta la wici karo 911

Wac 911

- Si aad u soo sheegtid wax u baahan in askari boliisi ah kuu yimaado (sida marka qof la weeraro ama qof la dhacayo)
- Si aad u heshid ambalaas loogu talagalay gargaarka degdegga caafimaadka
- Si aad u soo sheegtid dab
- Si aad u soo sheegtid dambi sameyntiisa lagu jiro
- Si aad u soo sheegtid hawl aan caadi ahayn ama dambi ah (sida qaylo, xabado la ridayo, qaylo gargaar doon ah, sanqadha qarsho ama quraarad jabaysa, dad aan la aqoon oo guri alaab ka saaraya).

Ha wicin 911:

- Si aad meel tilmaanteed u weydiisato
- Si aad u ogaatid war ku saabsan sharciga haysashada xayawaanka sida su'aasha ah inaad haysan kartid xayawaan iyo in kale
- Si aad u ogaatid haddii qof xabsi ku jiro
- Si aad u soo sheegtid xaaladaha aan shaqo ku lahayn boliis, dab, ama caafimaad.
- Si aad u soo sheegtid xaalad caafimaad oo aan waxqabad degdeg ah u baahnayn
- Si aad qof u weydiisid war ku saabsan beesha

Maxaa dhaca marka aad wacdid 911?

Wicitaanada 911 waxa lagaga jawaabaa 6 ilaa 12 sekan ama ilbidhiqsi ka dib marka aad wacdid. Marrarka qaarkood waxa jira aamuusnaan ah qiyaastii 5 ilaa 6 sekan ama ilbidhiqsi oo aanad cidna maqlin ka hor intaan qof kula hadlin—TELEEFONKA HA ISA SAARIN. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisiga waxa muhiim ah inaad shaqaalaha 911 u sheegtid afka aad ku hadashid.

Sidatan ayaa Igiriisiga lagu yidhaahda “Waxa aan ku hadlaa Soomaali” **“I speak Somali”**

Sida shaqaalaha teleefonka 911 u caawiyaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlan waxay hadba ku xidhan tahay meesha laga joogo Maraykanka. Waxa dhici karta in turjubaan teleefonka lagu soo galiyo ama waxa lagu weydiin karaa haddii u kala joogo qof ku hadla Ingiriisiga. Ulajeedadu waxa weeye in gargaar lagu soo diro sida ugu dhakhsaha badan. Waxa ku caawin kara barasha dhawr erey ama kalmadoodo oo Ingiriisi ah sida “boliis”, “dab” iyo “jiro” oo macnaheedu yahay jiro.

Halkan waxa lagugu barayaa ereyo wax ku tari kara. Afka Ingiriisiga boliis waxa la yidhaahdaa **“Police”** Afka Ingiriisiga dab waxa la yidhaahdaa **“Fire”** Ugu dambeyn, Afka Ingiriisiga jiro waxa la yidhaahdaa **“Sick”**



Shaqaalaha 911 waxa laga rabaa inuu ku weydiyo dhawr su'aalood si uu u fahmo xaaladda iyo meesha wax ka dhacayaan. Waxa dhici karta in su'aalaha qaarkood kuula eekaadaan inaan loo baahnayn, laakiin waxay muhiim u yihiin sidii loo habsan lahaa in dhibaata degdegga ah si cad loo fahmo Taasi waxay wax ka taraysii in la habsado in gargaarkii loo baahnaa (dab-damis, boliis, ama ambalaas ama wax kale) la geeyo meesha looga baahan yahay sida ugu dhakhsaha badan. Teleefonka ha ka bixin in alaale inta aad awoodid si aad shaqaalaha uga caawisid sidii gargaarka lagugu soo gaadhsii lahaa.

Text- Adapted from the Health Guide For Refugees In Minnesota by the Minnesota Department of Health, Refugee Health Program www.health.state.mn.us/divs/idepc/refugee This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>

A Healthy Roads Media project
www.healthyroadsmedia.org

How to Use the 911 Telephone System (Somali) - Reviewed 3/2009